



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS
Urban Education. Global Citizens.

9/30/15

Gacaliyeyaal Qoysaska Roosevelt,

Dugsiyada Dadaweynaha Minneapolis (MPS) ayey dhab ka tahay inay siiyaan ardayda oo idil waxbarasho heer sare ah, si cunugaagu ugu guulaysto dugsiga iyo noloshiisa. Si aan u xaqiijino guulaysiga cunugaaga, waxaan u dejinnay heer naqdi sarreeya ee ka fal celin kara waxyaabaha lagu baro fasalladeenna. Sannad dugsiyeedka soo socda waxaan eegaynaa qiimayn cabbirro kala duwan oo muujinaya siyaabaha dugsigeenu u guulaysanayo. Tan ayaa xaqiijinaysa inaan gaarno himmiladeenna ah in ardayda oo idil ay ku guulaystaan dugsiga iyo noloshooda.

sannadkan Roosevelt ayaa loo qoondeeyey inuu noqdo dugsi xoog saaraya (focus school) sida uu qabo Qaynuunka Federaaliga ah ee Dugsiga Hoose & Sare (Elementary and Secondary Education Act) (ESEA). Qoondaynta ayaa ku salaysan xogta hawl fulinta ardayga, taasoo ku meelaynaysay dugsigeenu inuu ka mid yahay boqolkiiba tobanka ugu badan ee bugcadda guul gaadhka ardayda u dhexeeya ee gobolka.

Sannad dugsiyeedkan waxuu noqonayaa sannadka koowaad ee saddex sano ee habraaca hagaajinta dugsiga (three-year process of school improvement). Qorshayanta habraacaasi ayaa loola jeedaa hagaajinta hawl-fulita ardayda oo idil. Inkastoo badida waxqabadyada dib u hagaajintu ay yool leeyihiin, isbeddello kale ayaa ka dhici kara dugsiga. Si aan uga guul gaadhno hawshaasi muhiimka ah, waxaan yeelan doonaan koox dib-u-hagaajin ka kooban shardi-hayeyaal kala duwan, ayna ku jiraan waalid. Waxaan idinku dhiirrigalinaynaa inaad xubin ka noqoto kooxda dib-u-hagaajinta; haddii aad danaynayso soo wac lambarka hoose.

Qoysaska iyo bulshada ayaa xuddun u ah qorshaheenna dib-u-hagaajinta dugsiga. Waxaa lugugu martiqaaday inaad nagala soo qaybgasho kulankeena sanadlaha ah ee Xaalada Dugsiga iyo Kulanka Title I. Ula jeedka Xaalada Dugsiga iyo Kulanka Sanadlaha ah ee Title I waa in lugu siiyo waalidka/iyo daryeelayaasha warbixin ku saabsan xaalada dugsiga ku sugan yahay hada iyo qorshaha hagaajinta ee dugsiga. Dugsigu waxaa uu waalidka la wadaagi doonaa hadafkiisa iyo waxyaabaha uu mihiimada siinayo iyo hababka uu ku gaarayo hagaajinta iyo waalidku sidii ay uga qaby qaadan lahaayeen waxbarashada sanadkoo idil. Kulankani waxaa lugu sharixi doonaa ula jeedka Title I iyo xiriirka waalidiinta/daryeelayaasha la rajaynayo in ay helaan waxyaabo qoyseeya kor u kaca waxbarsho ee caruurtooda. Haddii uusan kulanku dhicin ama aadan helin warbixinta, Na soo waydii maalinta iyo wakhtiga kulanka la qaybanayo

Ka qayb qaadashadaada iyo kaalmadaada ayaa muhiim u ah guulaysiga cunugaaga. Waxaan kugu dhiirrigalinaynaa inaad la xiriirto cunugaaga macallimiintiisa, saad u barato sida ugu wanaagsan ee cunugaagu fasalka wax ugu baran karo. waa kuwaan hoose dhawr waxyaabood eed samayn karto ee ka caawin kara cunugaaga waxbarashadiisa:

- Hubi in cunugaagu dugsiga tago maalin walba waqtiga loogu talagalay.
- U same meel deggan oo cunugaagu ku qabto shaqo gurigiisa ama wax ku akhriyo.
- Kala hadal cunugaaga dugsiga.

Waxaan idinka rajeynaynaa inaad sii waddaan ku shuqlanaanta iyo wada shaqaynta si sannad dugsiyeedkani u noqdo mid wanaagsan! Fadlan nagala soo xiriire 612-688-4800 haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ee la xiriira dadaalka dib-u-hagaajinta dugsiga ama sidaad uga qayb qaadan karto.

Si daacadnimo leh,

Micheale Bradley
Maamule/Principal